Hennepin Healthcare System	
Cinwaanka: Kaalmada Maaliyada (Daryeelka Aan la magdhabin)	**Xeerka #** 078815
Xeerka Kafiilka: Sarkaalka Sare ee Maaliyada	
Guddida(yada) Qiimaynta: Gollaha CFO, U hogaansanka, Wareega Dakhliga, Guddida Maaliyada	
Guddida Oggolaanshaha: Guddida Maamulayaasha HHS	
Taariikhda Asalka ah ee Oggolaanshaha: 04/05/2016	
La qiimeeyay/Dib loo eegay: 02/22/2023	

UJEEDADA

Hiigsiga Hennepin Healthcare System (HHS) waxaa ku jira daryeelka ugu wanaagsan ee suuragalka ah si loo daryeelo bukaan kasta oo aanu u adeegno, ay ku jiraan kuwan aan awoodin bixinta daryeelka. HHS waxay horumarisay xeerkan bixinta kharashka ama adeegyada lacagta la dhimay ee waafaqsan hawl galka iyo waajibkeeda iyo daryeelka Degmadda Hennepin.

XEERKA

Kaalmada Maaliyada waa la siin doonaa, takoor la'aan, bukaanada buuxiya shuruudaha u qalmida sida loogu diyaariyay halkan. U qalmida Kaalmada Maaliyada waxaa looga fekeri doonaa shakhsiyaadkan, aan caymiska ku jirin, caymis yar helo, ama aan u qalmin barnaamij kasta oo dheefta dowlada ee daryeelka caafimaadka, ama aan awoodin inay bixiyaan daryeelkooda, iyaddoo ku salaysan go'aanka baahida maaliyada si waafaqsan xeerkan iyo shuruucda federaalka ee cusbitaalada aan macaash doonka ahayn.

HHS waxa uu ku ballan qaadayaa daryeelka caafimaad lama huraanka ah dhammaan dadka ay ku jiraan kuwan aan caymiska ku jirin, caymiskoodu hooseeyo, aan u qalmin barnaamijka dowladda, ama haddii kale aan awoodin bixinta. Bukaanada waxaa laga filayaa inay ka qayb qaataan kharashka daryeelkooda kartidooda gaarka ah si loo bixiyo oo ay ula shaqeeyaan nidaaymada HHS ee helida dhammaan qaababka kale ee kaalmada caafimaadka (tusaale, caymiska caafimaadka gaarka ah, ama mid kasta oo ku habboon federaalka, gobolka, degmadda, ama barnaamijyada HHS), ee ahmiyada la siiyo marka la go'aaminayo Kaalmada Maaliyada.

QEEXITAANADA

Qadarka Guud ahaan Biilka Lagu sood iro (AGB): Qadarkan federaal ahaan la qeexay guud ahaan biil loogu diro bukaanada aan caymiska ku jirin. Qadarkan waxaa loo xisaabiyaa sida ay u baahdaan shuruucdaAdeega Dakhliga Gudaha (IRS).

Consolidated Omnibus Budget Reconciliation Act (COBRA): Sharciga federaalka oggolaanaya kordhinta wakhtiga xadidan ee dheefaha daryeelka caafimaadka shaqaalaha.

Qoyska: Istimaalka qeexida Xafiiska Tirakoobka, kooxda labba ama dad badan oo wada degen iyo ee kula xidhiidha dhalashada, guurka, ama korsashada. Si waafaqsan sharciyada Adeega Dakhliga Gudaha, haddii bukaanku sheegto qof sidii qof ku tiirsan cashuur celintooda dakhliga, waxaa looga fekeri karaa qof ku tiirsan ujeedooyinka bixinta kaalmada maaliyada.

Dakhliga Qoyska: Go'aan laga gaadhay bilaabida qeexida Xafiiska Tirakobka, ee isticmaala dakhliga soo socda marka la xisaabinayo hagitaanada faqriga federaalka: Waxa ku jirta waxyaabaha la shaqaysto, magdhowga shaqo la'aanta, magdhowga shaqaalaha, Amniga Bulshadda, Dakhliga Amniga ee Kaabida, kaalmada dad waynaha, lacag bixinta ciidankii hore, dheefaha samata bixiyayaasha, hawl gabka ama dakhliga hawl gabka, dulsaarka, macaashka la qaybsado, kirooyinka, gunooyinka, dakhliga ka yimid guryaha, khasnadaha, kaalmada waxbarashada, masruufka, taageerada carruurta, kaalmada ka timid dibada qoyska, iyo ilaha kale ee kala duwan.

A. Ka dib COBRA
B. Go'aan laga gaadhay ka hor qaabka cashuurta
C. Laga saaray faa'iidooyinkii iyo khasaaraha raasamaalka
D. Haddii qofku qoyska la nool yahay, ay ku jiraan dakhliga dhammaan xubnaha qoyska (laga saaray kuwa aan qaraabada ahayn, sida kuwa wada degen guriga).

Heerka Faqriga Federaaliga (FPL): Tallaabada dakhliga la soo saaray sanad kasta ee Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadamaha (Department of Health and Human Services). Heerarka faqriga Federaalka waxaa loo isticmaalaa si go'aan looga gaadho u qalmida barnaamijyada gaarka ah iyo dheefaha, ay ku jiraan kaydka caymiska caafimaadka Marketplace, iyo Medicaid iyo Barnaamihka Daboolida Caymiska Caafimaadka Carruurta (Children’s Health Insurance Program, CHIP) coverage.

Kaalmada Maaliyada (Daryeelka Aan la magdhabin): Kaalmada la siiyay bukaanada ee qaabka codsiga ah ee yareeya ama tirtira masuuliyada maaliyada ee ku salaysan u qalmida maaliyada. Xeerkan waxa uu tixraaci doonaa Kaalmada Maaliyada iyo Is ku beddelashada Daryeelka Aan la magdhabin.

Baahida Maaliyada: Ujeedada xeerkan sababta go'aan ka gaadhida waa FPLE xaga ama 300% ka hooseeya oo kama fekero kharashyada codsadaha.

Damiinka: Shakhsiga kaas oo sharci ahaan ka masuulka ah lacag bixinta waajibka maaliyada bukaanka.

Daryeelka Caafimaad ahaan Lama huraanka ah: Nidaam kasta ama adeeg kasta ee la go'aamisay inuu caafimaad ahaan yahay lama huraan kooxda daryeelka caafimaadka, aanay ku jirin qurxinta wejiga, qalabka caafimaad ahaan raaga, tafaariiqda, ilkaha, iyo nidaamyada la xusho. Adeegyada aanay bixin HSS loogama fekeri karo sidii qayb xeerkan ah.

U qalmida La malaynayo: Go'aanka u qalmida Kaalmada Maaliyada ee ku tiirsan kara macluumaadka ay bixiyeen iibiyayaasha kooxda saddexaad iyo macluumaadka kale ee guud ahaan la heli karo.

Dedaalka Macquułka ah: Dedaal badan, macquul ah, iyo dedaalka daacadnimo wanaagsan si loo xaqiijiyo wada xidhiidhka xeerarka Kaalmada Maaliyada iyo dhammaystirka codsiga nidaamyada. Tan waxaa ku jira wargelinta HHS ee Kaalmada Maaliyada xeerka oggolaanshaha, iyo qoraal ahaan wada xidhiidhka qoran ee bukaanka/damiinka ee ku saabsan biilka bukaanka, ay ku jiraan warbixinta iyo wicitaanada telefoonka, ka hor tallaabada ururinta inta aan la bilaabin.

Caymisku hooseeyo: Shakhsiga leh heer aan ku filnayn ee caymiska ama kaalmada kooxda saddexaad si looga kaalmeeyo kullanka waajibaadyadiisa/keeda la cag bixinta.

Caymis aan ku jirin: Gobolka shakhsiga haya qayb ka mid ah foomka caymiska caafimaadka aan bixin ilaalinta maaliyada dhammayska tiran.

NIDAAMKA

Dhammaan Gurmadka iyo Daryeelka Lama huraanka ah Caafimaad ahaan ee ay bixiso xarunta cusbitaalka waxaa lagu daboolaa Xeerka Kaalmada Maaliyada. Adeegyada aanay bixin adeeg bixiyayaasha HHS loogama fekeri doono sidii qayb xeerkan ah.

I. Barnaamijyada Kaalmada Maaliyada La heli karo:

Heerka qiimaynta u qalmida waa in loo buuxiyaa bukaanku si uu ugu qalmo Kaalmada Maaliyada (Daryeelka Aan la magdhabin):

A. Dhammaan bukaanada HHS Dakhligiisa Qoysku uu yahay ama ka hooseeya 300% Heerka Saboolnimada Federaalka (Federal Poverty Level, FPL) waxaa la siin doonaa helida Kaalmada Maaliyada waafaqsan xeerkan dhexda nidaamka codsiga ama u qalmida la malaynayo.

B. U qalmida kaalmada maaliyada waxaa looga fekeri doonaa shakhsiyaadkan, aan caymiska ku jirin, caymis yar helo, ama aan u qalmin barnaamij kasta oo dheefta dowlada ee daryeelka caafimaadka, ama aan awoodin inay bixiyaan daryeelkooda, iyaddoo ku salaysan go'aanka baahida maaliyada si waafaqsan xeerkan.

C. Bukaanada Dakhligoodu Qoyska waxay tahay ama ka hoosaysa 300% ee FPL, laakiin ee u qalma Gobolka ama daboolida daryeelka caafimaadka Federalka, waxay u qalmaan Kaalmada Maaliyada ilaa taariikhda u qalmida ee daboolida daryeelka caafimaadka.

D. Kaalmada Maaliyada waxaa laga fekeri karaa qaab xaalad-xaalad ah hoosta duruufaha gaarka ah ee adeegyada ay bixiso HHS ee aan lagu daboolin xeerkan.

II. Heerarka La shaqaynta Bukaanka

A. Bukaanku waxa uu dhammaysan karaa dhammaan doorashooyinka lacag bixinta kale, ay ku jiraan daboolida gaarka ah, federaalka, gobolka, iyo barnaamijyada kaalmada caafimaadka maxaliga ah, ka hor inta aan la ansixin ee Kaalmada Maaliyada.

B. Codsadaha Kaalmada Maaliyada marka koowaad waa inuu sameeyo dedaalada macquulka ah si loo sahamiyo oo loo diiwaan geliyo isha kale ee habboon ee lacag bixinta iyo daboolida ka timid barnaamijyada lacag bixinta gaarka ah iyo guud, ay ku jiraan daboolida COBRA haddii ay habboon tahay.

III. Nidaamka Codsiga

A. Codsiga Kaalmada Maaliyada waxaa lagu dhammaystiri karaa:

1. La shaqaynta La taliyaha Maaliyada HHS ama shuraakada ganacsiga
2. Codsashada onlaynka ah iyaddoo la booqanayo websaydka HHS hennepinhealthcare.org

3. Ka dhex codsashada kootaada HHS MyChart.

B. Muddada Codsiga Kaalmada Maaliyada: Bukaanku waa inuu codsadaa Kaalmada Maaliyada 240 maalmood gudahood ka dib taariikhda warbixinta biil bixinta koowaad ka dib adeegyada.

C. Codsiga Kaalmada Maaliyada waxa samayn kara bukaanka ama xubinta qoyska, saaxiib dhow, ama saaxiibka bukaanka, oo waafaqsan sharciyada xeerarka ku habboon.

D. HHS waxay u baahan tahay codsi dhammaystiran ay ku jiraan caddaymaha loo baahan yahay si loo gaadho go'aanka u qalmida iyaddoo U qalmida La malaynayo go'aankeeda la gaadho mooyaane.
   1. Codsiyada la dhammaystiray: HHS waxay ku wargelin doontaa go'aanka u qalmida qoraal ahaan boostada gudaha 30 maalmood.
   2. Codsiyada aan la dhammaystiran: Haddii codsigu aanu dhammaystirnayn marka dib ay u eegto HHS, codsdaha waxaa lagu wargelin doonaa boostada ama telefoon haddii macluumaad dheeraad ah loo baahan yahay si loo dhammaystiro codsiga. Codsadaha waxa uu lahaan doonaa 14 maalmood si uu u soo celiyo macluumaadka la codsaday.
   3. Codsiyada la Diiday: Codsadayaasha waxaa loogu sheegi doonaa boostadda marka la diido. Codsadaha waxa uu haysan doonaa 60 maalmood laga bilaabo maalinta codsiga la diido si loo bixiyo caddayn dheeraad ah. Wakhtigan ka dib, codsiga cusub ayaa loo baahan doonaa.

IV. Go’aanka U qalmida

A. U qalmida waxaa la go'aamin doonaa si waafaqsan nidaamyada ku lugta leh qiimaynta dheeraadka ah oo waxaa ku jiri kara:
   1. Codsiga kaalmada Maaliyada, kaas oo codsdaha looga baahan yahay inuu la shaqeeyo oo uu bixiyo macluumaadka qoyska iyo caddaynta la xidhiidha go'aan ka gaadhida baahida maaliyada.
   2. Isticmaalka ilaha xogta dibada bixiya macluumaadka ku saabsan bukaanka ama bukaanka damiinkiisa FPL kiisa.
   3. Dedaalada macquulka ah ee HHS, bukaanka ama la shaqaynta damiinka, si loo sahamiyo oo loo diiwaan geliyo ilaha kale ee ku habboon lacag bixinta iyo daboolida ka timid barnaamijyada lacag bixinta guud ama gaarka ah.
   4. Baahida Kaalmada Maaliyada dib ayaa loo qiimayn doonaa ugu yaraan si sanadle ah.

B. Codsiyada La ansixiyay
   1. Codsiyada la ansixiyay waxay ansax yihiin ilaa 1 sano laga bilaabo bisha codsiga.
   2. Kaalmada maaliyada waa la ansaxin karaa wakhti muddo gaaban si loo daboolo gol daloolooyinka daboolida ka hor inta aan si firfircoon looga shaqaysiin daboolida caafimaadka.

C. Ka noqoshada Codsiga/U qalmida Kaalmada Maaliyada: HHS waxay xaq u leedahay, oo ay ka noqon kartaa, ama tirtirtaa, ama wax ka beddeshaa abaal marinta haddii ay jiraan wax kuwan soo socda oo la aqoonsaday:
   1. Khiyaamo, si xun u metelid, ama tuugo.
   2. Isbeddelada xaalada maaliyada ee codsadaha.
   3. Duruufaha hoos u dhiga daacadnimada Barnaamijka Kaalmada Maaliyada (FAP).
   4. Codsadaha waa in loo baadho barnaamijka guud ama gaarka ah ee daboolida caafimaadka oo waxaa loo qaadanayaa inuu u qalmo ama aanu la shaqaynayn

nidaamka si loo codsado barnaamijka daboolida caafimaadka guud ama gaarka ah.

V. U qaadashada U qalmida

A. HHS waxay bixin kartaa Kaalmada Maaliyada La malaynayo oo ku salaysan macluumaadka laga helay ilaha kooxda saddexaad.

B. Kaalmada Maaliyada waxaa la go'aamin karaa codsi la'aan si waafaqsan duruufaha soo socda:

1. Bukaanku waa qofka helaya ee la xaqiijiyay ee federaalka, gobolka, ama degmadda barnaamijyada kaalmada ay maal geliso.
2. Bukaanka dhintay oo aan lahayn hanti la yaqaano.

VI. Heerka Qiima dhimista Kaalmada Maaliyada

A. Bukaanka aan u qalmin Kaalmada Maaliyada si waafaqsan xeerkan waxay heli doonaan daryeelka bilaashka ah.

B. Bukaanada aan la caymin ee u qalma Kaalmada Maaliyada si waafaqsan xeerkan waxay heli doonaa 100% lacag dhimista masuuliyada bukaanka.

1. Lacag dhimista qiimayaasha Kaalmada Maaliyada lagu sheegay xeerkan waxay waafaqi doonaa biil bixinta HHS iyo dhaqanka ururinta.

VII. Wargelinta Dad waynaha ee ku saabsan Kaalmada Maaliyada

A. Wargelinta ku saabsan barnaamijyada Kaalmada Maaliyada HHS waxaa ku jiri doona macluumaadka xidhiidhka oo waxaa u faafin doona HHS qaabab kale, oo ay ku jiri karaan, laakiin aan ku xadinayn:

1. Warbixinaha biil bixinta bukaanka.
2. Ogaysiiyada lagu soo dhejiyo qolalka gurmadka, aagaga dhigitaanka, rugaha caafimaadka, waaxaha aqbalaada iyo diiwaan gelinta, xafiisyada ganacsiga cusbitaalka, adeegyada maaliyada bukaanka siiba goobaha kale sida ay HHS doorato.

B. Macluumaadka ku saabsan Barnaamijyada Kaalmada Maaliyada HHS ay ku jiraan koobiyada HHS xeerka Kaalmada Maaliyada HHS iyo foomamka codsiga waxaa loo heli karaa dad waynaha kharash la'aan. Macluumaakdan waxaa laga heli karaa mid kasta oo ka mid ah qaababka soo socda:

1. Koobiyada korontada ah waxaa laga heli karaa websaydka HHS www.hennepinhealthcare.org.
2. Koobiyada warqadda waxaa lagu codsan karaa iimayl ahaan; finanicalcounseling@hcmed.org
3. Marka laga codsado goob kasta oo HHS ah.
4. Macluumaadkan waxaa lagu bixin doonaa luqadda koowaad ee ay ku hadlaan mujtamaca ay u adeegtay HHS.

VIII. Nidaamyada Lacag iska bixinta Lacag dhimista/Bukaanka

A. Barnaamijka Lacag dhimista Lacag iska bixinta**:** Si waafaqsan Heshiiska Cusbitaalka Qareenka Guud ee Minnesota, HHS waxay bixisaa lacag dhimista kharash iska bixinta bukaanada aan la caymin ee adeegyada caafimaad ahaan lama huraanka ah. Tani maaha barnaamijka Kaalmada Maaliyada iyo la heli karo ee codsiga aan lahayn ama u qalmida maaliyada.

1. Qiimaha lacag dhimista waxaa loo xisaabiyaa sanadle sida lagu qeexay Heshiiska Cusbitalka HHS ee Xafiiska Xeer ilaaliyaha Guud.

2. Lacag dhimista si otomaatig ah ayaa loo adeegsaday kootooyinka lacag iska bixinta.
3. Lacag dhimiska Kharash iska bixinta kuma habboona marka bukaanada leh caymiska oo looma adeegsado hadhaayada bulaanka caymiska lacag bixinta ka dib ay ku jiraan kharashka la wada bixiyo, jarjarida, iyo caymiska wadaaga ah.

B. Lacag dhimista dawo qorida waxaa la siin karaa dawo qorida laga dalbado hawl wadeenka cafimaad ee HHS oo lagu buuxiyo xaga farmasiiga bukaan jiifka HHS.

DHOKUMENTIYADA TAAGEERADA

FAP HHS Dhokumentiga Luqadda Cad (Ingiriisi)
FAP Luqadda Cad (Hmong)
FAP Luqadda Cad (Soomaali)
FAP Luqada Cad (Isbaanish)
Liiska Qandaraaska Dhakhtarka HHS

MACLUUMAADKA TAAGEERADA LEH

Sharciga/Heerka maamulka Tixraaca: IRS Sharciga 501(r), Heerka Guddida Wada jirka ah LD.04.03.07
Xeerarka La xidhiidha: Aqbalaada iyo Daawaynta, Biil bixinta iyo Xeerka Oggolaanshaha
Tixraacyada: Hagitaanada Saboolnimada federaalka ay daabacday Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadamaha Maraykanka • HHS, Baadhaha Guud ee Xafiiska, Hagitaanka taariikhdiis tahay Febraayo 2, 2004, cinwaankeedu yahay “Lacag dhimista Cusbitaalka La siiyo Bukaanada Aan awoodin Inay iska Bixiyaan Biilashooda Cusbitaalka” available at https://www.hhs.gov/guidance/document/hospital-discounts-offered-patients-who-cannot-afford-pay-their-hospital-bills • Warqadda taariikhdeedu tahay Febraayo 19, 2004, ka timid Tommy G. Thompson, HHS Xoghayaha, ku socota Richard J. Davidson, Guddomiyaha, American Hospital Association, ay ku jiraan Su'aalaha iyo Jawaabaha halkaas ku lifaaqan ee cinwaankoodu yahay “Su'aalaha Kharashyada Kuwa aan caymiska ku jirin” laga heli karo xaga https://www.cms.gov/medicare/medicare-fee-for-service-payment/acuteinpatientpps/downloads/faq_uninsured.pdf
Wada xidhiidhka/Waxbarashadda Shaqada:
Waxbarashadda Bukaanka: